

Caawinaad ka socota udoodaha caafimaadka maskaxda oo madax-banaan

Waxaad xaq u leedahay in aad caawinaad ka hesho udoodaha caafimadka maskaxda oo madax-banaan haddii aad dooneyso. Udoodayaashan waa dad daryeelkaaga lug kuleh.

Waxay kaa caawin karaan in aad hesho macluumaad ku saabsan daryeelkaaga iyo daaweyntaadaba, sababta isbitaalka laguugu hayo, waxa ay la micno tahay iyo xuquuqahaaga waxa ay yihiin. Way kuu imaan karaan si ay kuu arkaan oo ay kaaga caawiyaan in aad fahamto waxay ay kuu sheegeen dadka lugta ku leh daryeelkaaga iyo daaweyntaada. Haddii aad dooneyso, waxay kaa caawin karaan in aad dadkani la hadasho ama ayaga ayaa kuu hadli kara. Sidoo kale waxay kaa caawin karaan Maxkamadda.

Adiga iskaaga ayaad ula xiriiri kartaa adeega udoodaha caafimaadka maskaxda.

Waa in uu jiraa talefoon oo aad kala xiriir kartid adeega udoodaha oo aad si qarsoodi ah ula hadasho. Xubin ka mid ah shaqaalaha ayaad weydiin kartaa halka talefoonka uu yaalo.

Talefoon lambarka adeega udoodaha waa: